

## Sida aad u qaadid HIV/AIDS

### Maxay yahiin dhecaanka jirka ee laga helo HIV?

HIV waa firus ku nool dhiigga iyo dhecaanada kale ee ku jira jirka. In dheecaankaan laga wareejiyo hal qof loona wareejiyo qof kale waxay sababi kartaa cudur. HIV waxaa lagu faafin karaa saddax siyaabo oo muhiim ah – xariirka galmaada, kala qaadashada cirbadaha, iyo hooyada oo gudbisa cunugga inta ay xaamilada tahay, ama naas nuujinta.



### Dheecaanka la ogsoon yahay in laga helo qiyaas badan oo HIV ah waxaa ka mid ah:

Dhiigga Dhecaanka siilka  
Biyaha ragga Dhecaanka dabada  
Caanaha naaska

Qiyaas yar oo HIV ah waxaa laga helay **iliinta, cantuufta**, iyo **kaadida**, laakin dhecaanadaan **LAGUMA** arkin in ay faafiyaan cudurka HIV. HIV **LAGUMA** arkin dhididka aadanaha.

Waxaa dhici karto in **shaqaalaha xanaanada caafimaadka** la kulmaan dhecaano kale oo ku jira jirka laguna arko qiyaas badan oo HIV ah, sida:

*Dhecaanka Amniotic* – laga helo saxarada waqtiyada uurka

*Dhecaanka Cerebrospinal* – laga helo maskaxda iyo laf dhabarka

*Dhecaanka Synovial* – laga helo meesha xibnaha lafaha iska galaan

### Sidee ayay HIV ugu faaftaa dhecaanka jirka?

Saddax siyaabo waweyn ayay HIV ugu faaftaa jirka:

- Xariirka galmaada
- Uurka, dhalmada cunugga ama naas nuujinta
- Cirbadaha loo adeegsado mukhadaraadka

**Inta ay socoto galmaada** – HIV wuxuu ku faafaa derbiyada siilka, guska, dabada, ama afka. Marka la sameeyo galmaada siilka, afka, ama dabada, waxaa dhici karto in derbiyada meelahaan soo gaaro dhaawac,

taasoo u ogolaneysa HIVda gasho dhiigga qofka. Badanaa, dhaawacaan lama ogaado.

Cudurada laga qaado galmaada (STDyada) sida “chlarmydia” iyo jabtada, waxay sababaan in jajab yaryar ku yimaado derbiga siilka, afka, dabada, iyo guska. Tan waxay HIVda u ogolaataa in ay gasho dhiigga. Marka la soo qaado cudurada STD kuwasoo keena nabaro furan (sida cununka “herbes” ama sfiilatada), HIVda waxay ka geli kartaa nabarada.

**Waqtiyada uurka, dhalmada cunugga (marka cunugga ka soo baxaayo hoosta dhalmada), ama naas nuujinta** – HIV waxay ku faaftaa cudurka ku jira dhiigga ama caanaha la nuugo. (Tan waxaa loo yaqaan gudbinta hooyada-ilaa-cunugga).



**Natijjada ka dhallata marka mukhadaraadka loo adeegsado cirbadaha**  
– HIV waxay ku faaftaa marka la wadaago cirbadaha iyo “hawlaha” (tusaale kariyaha, qaadada, daboolka dhallada, filterada suufka, biyaha) ee ku wasaaqoobi kara dhiigga cudurka qaba.

### AAD ayay u yar tahay in HIV ku faafsto:

- Marka qofka lagu shubo dhiig cudur qaba.
- Shaqada (badanaa shaqaalaha xanaanada caafimaadka ee xariir la sameeyo dhiig cudur qaba ama dhecaano kale).

Marka xibin jirka lagu talaalo qof



Hubso in aad jawaab u heshid su'aalaha aad ka qabtid HIV/AIDS. Waaxdaada xanaanada caafimaadka dadweynaha iyo bixiyahaada xanaanada caafimaadka ayaa ku siin kara kaalmo.

Text adapted from materials on the AIDS.gov website.  
Handout by Healthy Roads Media ([www.healthyroadsmedia.org](http://www.healthyroadsmedia.org)).  
Funding from Division of Specialized Information Services of the National Library of Medicine It can be freely distributed under the Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivs License (<http://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/3.0/us/>)